

Maanta waanu ka xunahay oo waa laga daahay in lays siiyo daawada xanuun jebinta.

Sida ku cad hanaankeena shaqo baa waxaa ah in caruurta ka yar da'da 7 sanno ay mar waliba helaan fursad lagu siiyo daawada xanuun jebinta marka laga qaadayo tijaabada xididka. Waxaa xanuunjebin loo isticmaalayaa sharootada ama kiriimka (bomaatada) xanuunjebita ee EMLA®.

Sharootada waa iney ku dheganaataa maqaarka 1 saac, mararka qaarna in ka badan, si ay u siiso xanuun jebinta ugu wanaagsan. Markaa tijaabada lagama gaarayo in la qaado inta aanu maanta shaqada xidihin.

Waanu ku tusi karnaa halka sharootada loogu dhejinaayo maqaarka markaana waxaad guriga u qaadanaaysaan sharooto si aad ugu dhejisaan meesha jidhka loogu dhejinayo ee laydin tilmaamay.

Sharootada waa iney ku dheganaatay maqaarka 1 saac, mararka qaarna in ka badan, inta aadan u iman tijaabo qaadista.

Marka laga qaado sharootada waa inuu qofku sugaa 10-15 daqiiqadood intaan la qaadin tijaabada.

Haddii aad rabtaan inaan annaga idinku dhejino sharootada markaa waxaad noo imaaneysaan ugu dambeyn 2 saacadood ka hor inta aan la gaarin waqtiga xidhitaanka shaqada.

Waa inaad doorataan hal maalin oo si fiican idinkugu habboon.